



Barnaamijka Foojarka Sekshan 8-ka Ee Guryeynta Xulashada Waxaa Furmaya Liisaska Sugitaanka

Hay'adda Guryeynta iyo Dib-u-horumarinta (METRO HRA) ee Metropolitan Council, Hay'adda Guryeynta Dadweynaha ee magaalada Miniyabolis, Minneapolis Public Housing Authority, iyo Wakaalada Hay'adda Guryeynta Dadweynaha ee magaalada St. Paul ee St. Paul Public Housing Agency, **waxey furayaan** oo aqbali doonaan codsashada arjiyadda ee barnaamijka foojarka sekshan 8-ka ee ikhtiyaariga oo uu qofku laguur-guuri karo.

ARJIYADDA CODSIGA EE INTERNETKA (ONLINE) WAXAA LA HELI KARAA
8:00 SUBAXNIMO, ARBACO, BISHA JUUN 12, 2019

ilaa

12:00 DUHURKII, TALAADADA, JUUN 18, 2019



Codso liiska codsiga sugitaanwalba si gaar ah. Codso waqti kasta inta lagu jira mudada uu furan yahay- Waa in arjiga codsiga lagu soo gudbiyaa kombuterka (online) inta ka horeysa 12:00 duhurnimo, Talaado, Juun 18, 2019. Waa isku mid oo maleh faa'iido ama muhiimad hore u sii codsasho ah. Si aad u buuxsato arjiyadaan codsiga (24 saac maalin walba mudada waqtiga la xusay) booqo oo gal shabakadahaan internetka ee soo socoda:

Metro HRA - www.WaitlistCheck.com/METRO

The Metro HRA waxey qaadaneysaa 2000 codsade oo dhigeysaa ama gelin doontaa liiskeeda sugitaanka si bakhtiyaa-nasiib ah oo aanan kala sooc lahayn ayey oga soo xulanaysaa dhamaan arajidii la helay. Metro HRA waxey siineysaa 95% codsadaaashii la dhigey liiska sugitaanka codsadaaasha ku nool, ka shaqeysta, ama iskuul waqti-buuxa ka dhigta 7-da degaanka magaalooyinka mataanaha ee aaga Metro Area (Anoka, Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott and Washington Counties). Inta hartey ee 5% ee la dhigey liiska sugitaanka waxaa la siinayaa wixii kale ee ah codsade.

Minneapolis - www.WaitlistCheck.com/MPHA

The Minneapolis Public Housing Authority waxey qaadaneysaa 2000 codsade oo dhigeysaa liiskeeda sugitaanka si bakhtiyaa-nasiib ah oo aanan kala sooc lahayn oga soo xulanaysaa dhamaan arjiyadii la helay. Hay'adda guryeynta waxey siineysaa 95% codsadaaashii la dhigey liiska sugitaanka codsadaaasha ku nool, ka shaqeysta, ama iskuul ka dhigta Miniyabolis(Minneapolis). Inta hartey ee 5% ee la dhigey liiska sugitaanka waxaa la siinayaa wixii kale ee ah codsade. Doorbidda meesha degenaanshaha ma leh ujeedo ama saameyn ah daahin amase diidida gelitaanka aqbalida oo ku saleysan jinsiyada, midabka, asalka qofka ka yimid, lab iyo dhedig, diinta, naafonimadda, ama da'da qofkasta oo xubin ka ah qoyska codsada.

St. Paul - www.WaitlistCheck.com/STPAUL

The St. Paul Public Housing Agency waxey qaadaneysaa 3,500 codsade oo ay dhigeysaa liiskeeda sugitaanka si bakhtiyaa-nasiib ah oo aanan kala sooc lahayn ayey oga soo xulanaysaa dhamaan arjiyadii la helay. Wakaalada hay'adda guryeynta waxey siineysaa 95% codsadaaashii la dhigo liiska sugitaanka codsadaaashii qofka guriga madaxda ka ah ama isqabaan uu ku nool yahay, ka shaqeysta, ama iskuul ka dhigta magaalada St. Paul, amase codsadaaashii ah "Guri la'aan" marka loo fiiriyo nidaamka isku-duboridka gelitaanta dadka guri'la'aanta ee degmadda Ramsey ee loo yaqaan Coordinated Entry System. Inta hartey ee 5% ee la dhigey liiska sugitaanka waxaa la siinayaa wixii kale ee ah codsade.

Barnaamijka foojarka guryeynta ee Sekshan 8-ka ikhtiyaarka ah wuxuu siiyaa caawin xaga kiradda ah qoysaska daqligoodu aadka u yar yahay. Si aad ugu qalantana, wadarta daqliga qoyska ma ka badan karto:

- | | | |
|----------------------|----------------------|----------------------|
| • 1 qof: \$35,000 | • 4 qofood: \$50,000 | • 7 qofood: \$62,000 |
| • 2 qofood: \$40,000 | • 5 qofood: \$54,000 | • 8 qofood: \$66,000 |
| • 3 qofood: \$45,000 | • 6 qofood: \$58,000 | |

Arjiyada codsashada lagama heli karo xafiisyada hay'adahaan, fakis(fax) ama qoraalka internetka (email) lama aqbalaayo. Codsadaaashu waxey isticmaali karaan kombuter kasta, kan gacanta loo yaqaan (Tablet) amase telefoonka casriga (smart-phone) is ay u codsadaan, oo ka mid tahay kombuterka lacag la'aanta ee maktabadaha dadweynaha iyo hay'addaha guryeynta, hadii la heli karo. Codsadaaasha ubaahda qiil u raadis ama sharci wax kabadal suuragal ah(reasonable accommodation), caawin turjumaan bilaash ah, amase ku raba maclumaadkaan qaab kale waxaa lagu dhiirgalinayaa in ay codsi horey ugu soo gudbiyaan midkasto oo ka mid ah hay'adahaan guryeynta ka hor furitaanka liiska sugitaanka. Turjumaadda ayaa lagu heli doonaa 60 luuqadood oo kala duwan.